

Injirta madaxa, wargelin ku socota waalidiinta

Iskuulkayaga arday dhigata ayaa injirta madaxa laga helay. Si injirta loo baabi' iyo waa muhiim in qoys walba uu carruurtiisa oo dhan madaxooda si fiican oo taxader leh injirta uga baaro. Waa in timaha iyo madaxa maqaarkiisa si fiican looga fiiriyaa injirta, iyadoo timaha inyar inyar loo qaybqaybinayo oo la rogrogayo. Waana in madaxa maqaarkiisa oo dhan sidaas injirta looga raadiyaa. Si fiican ugu fiirso dhegaha salkooda iyo jeegada (qadaadka).

Injirta waxaad carruurtiina madaxooda ka saari kartaan idinka oo isticimaalaya shaambada NIX shampoo ama shaambada/milanka PRIODERM shampoo/ liuos. Shaambada waxaa laga helaa farmashiyaha, sida loo isticimaalaana waxay si sharaxan ugu qoran tahay baakadda shaambadu ku jirto. Dharka gogosha sariirtaha ee carruurta iyo qoyska oo dhan waa in lagu dhaqaa kulayl ah 60 digrii. Shanlooyinka iyo burushyada lagu shanlaysto oo dhan jeermiska ka dil, oo ama karkarin ama afar iyo labaatan saac firisarka berefeeyaha ah (pakastin) geli ama xilliga qabowga badan jiro bannaanka qabow dhig. Dharka ay dhiqidoodu dhibka tahay, in injirta iyo ukumeheeda laga dilo waxaa ku filan, in laba saacadood dharkaas la dhigo sawnada oo kulaylkeedu ka sareeyo 80 digrii. Waxaa kaloo muhiim ah, inaad carruurtiinna maalin walba timaha ugu shanlaysaan (feedhaan) shanlada baakadda shaambada la socota ee ilkeheedu isu dhowdhow yihiin. Shanlayntu qindhicilka oo injirta ukumeheeda ah bay timaha ka saaraysaa. Qindhicilka waxaa kaloo timaha looga saari karaa iyadoo faraha lagaga soo fuujinayo timaha, sababtoo ah mararka qaar shanladu kuma filla inay qindhicilka timaha ka soo dhammayso.

Ilmaha madaxiisa waxaa dib loo fiiriyaa, markuu qiyaastii todobaad ka soo wareego wakhtigii shaambada lagu dhaqay. Sidaas baana loo habsadaa, inuu qindhicilkiina baaba' ay. Haddii loo baahdo, daryeelka todobaad walba waa la cusboonaysiiyaa, iyadoo haddii loo baahdo nooca shaambadana nooc kale lagu beddelayo. Qindhicilku waa injirta ukumeheeda oo waa waxyaabo yar yar oo caddaan ah oo madaxa maqaarkiisa u dhow ama timaha ku dhegsan.

Injirta madaxu waa dullin yar yar oo nool oo madow ama kaffee madow ah, dhererkeeduna waa 0.5 - 3 mm. Madaxa maqaarkiisana aad bay ugu socsocotaa. Injirtu waxay inta badan jeceshahay dhegaha salkooda iyo jeegada. Madaxa maqaarkiisa waxaa kaloo lagu arki karaa dhibco madmadow oo aan dhaqdhaqaaq lahayn. Kuwaasi waa injiro dhintay qolofoodii oo marka madaxa maqaarkiisa la shanleeyo bay madaxa ka soo fuqaan.

Injirta madaxa waxaa lagu kala qaadaa istaabashada. Sidaas darteed waxaannu ku talinaynaa in wakhtiga injirtu jirto gacmaha si firfircooni leh la isaga dhaqo. Waxaa kaloo fiican in carruurta la xusuusiyo, in aanay saaxiibadood kala bedbedelan koofiyada iyo dharka kale toona, oo ay mar walba isticimaalaan shanlooyinka iyo kuwa timaha lagu xirto ee ay iyagu iska leeyihiin oo keliya. Koofiyadaha iyo madaxgashiyada lama saaro meelaha jaakadaha la surto ee qof waliba wuxuu dhexgeliyaa jaakadiisa gacanteeda.

Haddii loo baahdo, waxyaabaha injirta madaxa ku saabsan, waxaad la xiriiri kartaan kalkaalisadiinna daryeelka caafimaadka.

Marka ilmaha injirta laga daaweeyo, dadka ay isku guriga ku nool yihiinna ay hal mar isticimaaleen daawada injirta, ilmuhu isla markiiba wuu aadi karaa xannaanada ama iskuulka.

Waddamada heerka noloshoodu sarrayso xitaa si joogto ah baa loogu arkaa injirta madaxa, sidaas darteed khasabna ma aha inay injirtu ka dhalato nadaafad xumada.

Daryeelka caafimaadka ee magaalada Oulu